# Sameynta dowladda xigta ee Soomaaliya

*Arrimaha ay muhiimka tahay in diiradda la saaro si loo dhiso xukuumad la wada oggolyahay*

MADASHA WADAHADALLADA SOOMAALIYEED

## Dulmar guud

Codka kalsooni kala noqoshada ee 25-kii Luulyo lagu riday Ra'iisul Wasaarihii Soomaaliya wuxuu horseeday kalsooni darro siyaasadeed oo kasoo cusboonaatay Soomaaliya; dhaqanka siyaasadeed ayaa ah in uu Madaxweynaha soddon maalmood kusoo magacaabo Ra'iisul Wasaaraha xiga, kaasoo isaguna magacaabi doona gole wasiiro.

Arrinkan ayaa kusoo aadaya xilli muhiim u ah geedi-socodka siyaasadeed ee Soomaaliya. Muddada Madaxweynaha ayaa ku eg 7-da Febraayo 2021, wakhtiga baarlamaankana wuxuu ku eg yahay 27-ka Diseembar 2020. Weli waxaa jira is-qab-qabsi u dhaxeeya jilayaasha siyaasadda oo ku qotoma qaabka doorashada si loo doorto hoggaanka qaranka dhamaadka mudo xilleedka kadib. Waxaa jira halis sii kordheysa oo ah, iyadoon loo eegin qaabka doorashada ee lagu heshiiyay, in hirgelinta doorashada aan lagu dhammeystirin wakhtiga haray. Xil-ka-qaadista Ra'iisul Wasaaraha ayaa sii kordhisay xaaladda cakiran.

Xaaladan siyaasadeed ayaa sidoo kale siineysa daneeyayaasha Soomaaliyeed fursad ay kusoo dhisaan dowlad cusub oo ku saleysan is-afgarad iyadoo loo marayo wadahadal, taasoo lagu xallin karo is-mari-waaga haatan ka taagan doorashada. Haddii dowladda xigta lagusoo dhiso wadatashi baaxad weyn, oo leh soojiidasho baahsan, waxay dhalin kartaa geeddi-socod doorasho oo lagu kalsoonaan karo, kaasoo sidoo kale sii horumarin kara ka qeybgalka iyo metelaadda doorashada ee Soomaaliya.

Si loo dhiirrigeliyo wadahadal wax-ku-ool ah oo ku saabsan sameynta dowladda xigta xilligan adag, Madasha Wadahadallada Soomaaliyeed (Somali Dialogue Platform) ayaa soo saartay qormadan kooban, oo soo bandhigeyso toddobo su'aalood oo muhiim ah lana xiriira sameynta iyo ka shaqeynta dowlad ku saleysan is-afgarad. Su'aalahani waxay tusaalooyin kasoo qaadanayaan xaalado kale, halkaasoo geeddi-socod cusub oo dhisme dowladeed ah loo isticmaalay in lagu maareeyo khilaafaadka, iyo xaaladaha qaarkood, in la taageero hirgelinta hannaan doorasho oo lagu kalsoonaan karo.

Qoraalkan gadaal kama riixayo mid kamid ah qaababka doorasho, mana taageersana qaab doorasho gaar ah, laakiin waxaa loogu talagalay in lagu dhiirigeliyo wadahadallo wadajir ah oo ku saabsan dhisidda dowladda soo socota. Maamullada qaar ee Soomaaliya waxay taageeraan hannaan doorasho oo aan toos ahayn si loo hubiyo in xil-wareejinta wakhtigeeda ku dhacdo. Soojeedimahaani weli waxay noqon karaan kuwo waxtar u leh sameynta habab ku saleysan is-afgarad ee naqshadeynta iyo maaraynta geedi-socodka noocaas ah, iyo, haddii loo baahdo, hubinta in lagu meelmariyo wixii wakhti kordhin farsamo ah ee loo baahan yahay si loo dhammaystiro dhaqangelinta howlaha.

Maamullada kale ee Soomaaliya waxay taageeraan doorashada tooska ah, iyadoo lagu saleynayo sharciga doorashada, ee uu Madaxweynuhu saxiixay 21-kii Febraayo 2020. Soojeedintaani waxay sidoo kale faa'iido u yeelan karaan dhisidda dowlad leh aqbalaad ku filan iyo karti ay si guul leh dalka u gaarsiin karto hannaanka doorashada tooska ah oo ku dhacayo muddo yara durugsan. Sameynta dowlad ku dhisan is-afgarad ayaa xitaa laga yaabaa in ay fursad u hesho wadahadal iyo is-aaminaad dhexmarta jilayaasha siyaasadeed taasoo horseedi karta sameynta iyo aqbalaadda qaab doorasho oo ah tanaasul u dhexeeya labadan nooc.

*Arrimaha ay muhiimka tahay in diiradda la saaro si loo dhiso xukuumad la wada oggolyahay*

## 1. Waa maxay noocyada dowlad ku dhisan is-afgarad?

Waxa jira noocyo badan oo dawlado ah oo dhiirrigeliya is-afgarad. Waxaa ka mid ah: dowlad xil-gaarsiin; dowlad isbahaysi; dowlad midnimo qaran; dowlad wadaag ah; dowlad awood qeybsi; dowlad xirfadyahanno; iyo dowlad midnimo.

Erayadan kala duwan waxay muujinayaan fahamka kala duwan ee ujeeddada, waajibaadka, iyo curinta dowladda. Tusaale, "is-afgarad qaran" wuxuu muujinayaa in dhammaan jilayaasha siyaasadeed ay oggolaadaan go'aannada waaweyn, halka "isbahaysi dowladeed" laga yaabo inuu ku kooban yahay aqlabiyadda, laakiin aysan u dhameyn dhammaan jilayaasha siyaasadda, sidaas darteedna u baahan kaliya oggolaansho aqlabiyad ee go'aannada muhiimka ah. "Dowlad midnimo" ayaa soo jeedin karta damac laga qabo in laga gudbo kala qeybsanaantii hore ee u dhexeysay kooxaha siyaasadeed, halka "dowlad awood-qeybsi" ay dhici karto inay soo jeediso in kala fikir duwanaanta jirta ay sii jiraan, laakiin hay'adaha dowladeed dib loo habeeyo si ay si wanaagsan ugu maareeyaan khilaafyadan. Helitaanka fikradda guud ahaan la aqbali karo waxaa fure u noqon kara su'aalaha soo socda: sida awoodda loo qeybiyo, sida go'aannada loo gaaro, sida khilaafyada loo xalliyo, iyo waxa ay sharci u arkaan muwaadiniinta.

Soomaaliya sidoo kale waxey leedahay khibrad dheer oo ku aaddan maareynta kala guurka kadib khilaafka iyadoo loo marayo geeddi-socodyada dowlad loo dhanyahay ee muddada gaaban iyo muddada dheer, lagasoo bilaabo dhisidda dowladdii kumeelgaarka ahayd iyo nidaamka 4.5 shirkii Carta ee 2000, illaa maareynta doorashooyinkii dadbanaa oo ay ku heshiiyeen Madasha Hoggaanka Qaran sanadkii 2016. Howlahan, in kasta oo ay leeyihiin cillado, waxay soo bandhigayaan tusaalayaal ku saleysan siyaasad loo dhanyahay oo ay daneeyayaasha Soomaaliyeed kasoo qaadan karaan cashiro, marka la eego ismari-waaga hadda taagan.

## 2. Maxay ka kooban tahay xukuumad wada-ogol ku dhisan?

Sameynta xukuumad xoojisa awood-qeybsiga ayaa inta badan ku lug leh u qoondeynta rasmiga ah ee hey'adaha leh awoodda go'aan gaadhista dad badan oo katirsan jilayaasha siyaasadda ee muhiimka ah. Xukumaadaha noocaas ah ayaa sida caadiga ah la sameeyaa kadib qalalaase ama jahwareer siyaasadeed, si loo fududeeyo ka qeybgelinta maamulka dhinacyada khilaafka ku lugta leh. Xukuumaddii la dhisay kadib qalalaasihii doorashadii Kenya ee 2007-8 waxay ahayd xukuumad isbahaysi oo ka kooban labada tartame ee u tartamayay madaxweynenimada iyo xisbiyadooda siyaasadeed, iyo xukuumad awood qeybsi ah oo ka dhexaysay labadaas shakhsi. Xukumadihii awood-qeybsiga ku dhisnaa ee Koofurta Suudaan sida muuqata way balaarnaayeen, waxaana kamid ahaa xisbiga xukunka haya, xisbiga mucaaradka ugu weyn, iyo sidoo kale inta badan xisbiyada siyaasadeed ee yar yar. Xoog-saaridda awood-qeybsiga, si kastaba ha ahaatee, waxay wiiqi kartaa wada-shaqeynta maamul ee dowladda.

Dhinaca kale, xukuumado farsamo-yaqaan ah ayaa la sameeyay dalalka qaar, sida Jamhuuriyadda Afrikada Dhexe sanadkii 2014, halkaas oo madaxweyne kumeelgaar ah, oo aan dhinac u xaglinayn loo magacaabay inuu dalka ku hoggaamiyo doorashooyinka 2015-16. Xukuumaddi Talyaaniga ee 2011-13 waxay gabi ahaanba ka koobneyd farsamo-yaqaanno waxaana hogaaminayay nin dhaqaalayahan ah si uu wax uga qabto dhibaatada dhaqaale ee dalkaas. Si kastaba ha noqotee, labadan xukuumadood midkoodna si buuxda ugama aysan qeyb ahayn dhammaan jilayaasha siyaasadeed ee dalalkaas.

Sidaas darteed waxaa jira suurtogalnimo ah in la isku dheelitiro awood-qeybsiga iyo kartida xubnaha xukuumadda oo iyaduna mudan in la tixgeliyo. Xukuumadaha waxkasta ka horeysiiya ka-qeybgalka waxaa laga yaabaa in ay noqdaan kuwo fadhiid ah, gaar ahaan marka xubnaha xukuumadda ay eeganayaan danahooda doorashada xigta. Si kastaba ha noqotee, waxa kale oo dhici karta in masuuliyiinta ay muddada kooban ee xil-heyntooda u isticmaalaan in ay mudnaanta koowaad siiyaan danahooda gaarka ah, iyagoo og inay qarka u saaran yihiin in ay waayaan kuraastooda.

Soomaaliya waxaa ka jira daneeyayaal badan oo ay tahay in laga fiirsado marka laga hadlayo dhisidda xukuumad wadaag ah. Xukuumadda ku dhisan awood-qeybsi waxay u baahan tahay in ay tixgeliso dowladaha xubnaha ka ah dowladda federaalka, si ay si hufan ugu maareeyso khilaafyada u dhexeeya dowladda Federaalka iyo dowlad goboleedyada. Qeyb  kale oo muhiim ah waa kooxaha siyaasadeed ee mucaaradka ah ee Muqdisho jooga. Baarlamaanku sidoo kale waa saamile weyn, kaalintiisuna wuxuu u baahan doonaa in la caddeeyo, sida in awood-qeybsiga aanu wiiqi doonin kaalinta baarlamaanka. Nidaamka awood-qeybsiga ku saleysan qabiilka ee 4.5 ayaa sidoo kale loo baahan doonaa in laga fiirsado marka la dhisayo xukuumadda cusub.

Taa beddelkeed, Soomaalidu waa ku heshiin karaan xukuumad-farsamo wakhtiga gaaban oo haray, oo hoggaankoodu aanu u tartamin xil sare doorashada soo socota. Dowlad noocaas oo kale ah waxay yeelan kartaa howl aad u gaaban si ay usoo saarto hannaan doorasho oo lagu kalsoonaan karo islamarkaana waxay yarayn kartaa u xaglinta kuwa awoodda heysta ama waxay fulin kartaa qorshe ballaaran oo dib-u-habayn lagu heshiiyay.

## 3. Waa maxay ujeeddada xukuumad ku dhisan isla-gudoomin? Sidee ujeeddadan ula xiriirtaa waajibaadka ku xusan dastuurka ama sharciga?

Caddeynta ujeeddadu waxay muhiimm u tahay si hagaagsan u shaqeynta xukuumad ku saleysan isla-gudoomin. Xukuumadda noocaas ah guud ahaan waxaa loo aasaasaa inay qabato hawlo gaar ah, sida abaabulka iyo gaarsiinta doorashada qaran. Sikastaba ha noqotee, howl-maalmeedka maamul ee xukuumadda, gaar ahaan marka amni darrada badan tahay, lama illoobi karo. Caadi ahaan, xukuumadaha muddada gaaban waxaa ka tan badiya masuuliyadaha adage ee loo idmaday taasoo ka dhigeysa xaqiijintooda mid aan macquul ahayn. Dalka Suudaan 2005, waajibaadka xukuumaddii midnimada qaran waxaa kamid ahaa waxkasta sida abaabulidda tirakoob qaran, dib-u-heshiisiin qaran iyo daadajinta dhaqaalaha. Ujeeddooyinka xukuumddii kumeelgaarka aheyd ee Kongo oo la aasaasay sanadkii 2002 waxaa kamid ahaa dib-u-dhiska dalka, dib-u-dhiska nabadgalyada dalka oo dhan, dib-u-heshiisiin qaran, abuuritaan ciidan qaran oo isku dhafan iyo abaabulidda doorashooyinka. Inkastoo howl kasta ay muhiim u tahay dalka, haddana liiska waxyaabaha mudnaanta leh oo aad u dheer, aadna u adag, dartood ayaa laga yaabaa in xukuumadda la dhisayo ay ku dhibtoon doonto inay wax-ka-qabato midkoodna waxayna u badan tahay inay niyad jabto.

Waxa kale oo muhiim ah in la tixgeliyo ujeeddada xukuumad wadaag ku dhisan oo sii wadaysa ku shaqeynta qaab dastuuri ah. Inkastoo awoodaha xukuumadda lagu caddeyn karo dastuur, haddana heshiis dheeri ah ama caddeyn ayaa loo baahan karaa si loo caddeeyo waxa ay tahay in ay xukuumadda qabato iyo waxa aanay qabaneyn. Bayaanka lagu heshiiyey waxaa loo adeegsan karaa in uu beddelo hannaanka dastuuriga ah ee jira, sida dalka Suudaan sanadkii 2019. Ama, gorgortanka ayaa waxaa ka dhalan kara is-faham ku saabsan sida ay u kala duwan yihiin sida hay'adda fulinta iyo sharci dejiyaasha u wada shaqeyn doonaan muddada xukuumadda.

Soomaaliya, hal ikhtiyaar ayaa ah in si fudud loo magacaabo raysal wasaare cusub iyadoo la raacayo Dastuurka Federaalka Kumeelgaarka ah, kaasoo ay aqbalsan yihiin dhammaan daneeyayaasha islamarkaana dalka ku hoggaamin kara hannaan doorasho wakhtiga ugu yar uguna macquulsan. Dhanka kale, xukuumadda soo socota waxaa lagu abuuri karaa heshiis siyaasadeed oo cusub kaasoo kalsooni weyn siiya jilayaasha ballaaran – tusaale ahaan iyadoo lagu darayo habab gaar ah oo ay ku jiraan dowladaha xubnaha ka ah dowladda federalka go'aan qaadashada doorashooyinka. Tan waxaa kamid noqon kara nooc shir qaran ah oo ay kujiraan heerarka kala duwan ee dowladda, taasoo u xilsaarnaan doonta inay kormeerto go'aanno gaar ah. Tani waxay oggolaan kartaa dib-u-habeyn ballaaran, sida sii socodsiinta dib-u-eegista dastuurka, iyo sidoo kale hirgelinta hannaanka doorashooyinka dimoqoraadiga ah.

## 4. Muxuu yahay wakhtiga xukuumad isla- gudoon ku dhisan?

Su'aasha ku saabsan wakhtiga ayaa muhiim u ah Soomaaliya, nooc kasta oo muddo kororsi hal dhinac ah wuxuu dhalin karaa cawaaqib xumo. Jilayaasha siyaasadda waxay lahaan karaan fikrado ku saabsan waxa loo arki karo wakhtiga la aqbali karo ee xukuumdda soo socota. Sikastaba ha noqotee, si loo go'aamiyo wakhtiga xukuumadda soo socota  waxaa loo baahan yahay in la tixgeliyo saadka iyo shuruudaha wax-ku-oolka ah ee hawlaha loo igmaday inay gaarsiiso. Tusaale ahaan, muddada xukuumadda waa in ay noqotaa mid ku filan in

lala xisaabtamo wakhtiyada lagu fulinayo doorashada, iyo wakhti ku filan xil-wareejinta doorashada kadib, si loogu oggolaado in si kumeelgaar ah awoodda loogu wareejiyo dowladda lasoo doortay. Sidoo kale, dib-u-dhac ku yimaadda jadwalka doorashada waxay horseedi kartaa muddo kordhin ka baxsan wakhtigii hore loogu heshiiyay.

Soomaaliya inta badan jilayaasha siyaasadeed waxay inta kale ka hormarinayaan wakhtiga geedi-socodka doorashada. Wakhtiga xukuumadda soo socota waxaa loo baahan yahay in si taxaddar leh looga fiirsado, iyadoo lagu saleynayo nooca doorashada. Xitaa hannaanka doorashada dadban waxay u baahnaan kartaa wakhti badan si loo xaqiijiyo in kabadan wakhtiga harsan, wakhtigaas oo ka dhalanaya sababo la xariira heshiiska siyaasadeed ee loo baahan yahay iyo caqabadaha farsamo ee hirgelinta doorashada. Hannaanka doorashada ee aadka u adag waxay u baahnaan doontaa wakhti dheeri ah, taasoo beddelkeeda ay ku xiran tahay is-aaminaad ballaaran iyo is-afgarad u dhaxeeya hoggaamiyaasha siyaasadda, si ay u noqoto mid shaqeyn karta. Sikasta ha noqotee, wixii isbeddel ah ee ku yimaada muddo-xilleedka uu dastuurku farayo wuxuu u baahnaan doonaa in ay heshiis ka gaaraan dhammaan daneeyayaasha.

## 5. Sidee ayaa go'aannada dowladda loo qaataa, is-afgaran-waaga iyo khilaafyadana loo xalliyaa?

Way fududdahay in la gaaro is-faham mabda'a ahaan marka loo eego ku dhaqanka dhabta ah, markastana dowladaha ku saleysan is-afgaradka waxay khatar ugu jiraan isku-dhac siyaasadeed. Qaacidooyinka awood-qeybintu waxay kusii talogeli karaan suurtogalladaas oo kale iyadoo la fulinayo dariiqyada loogu talo galay go'aan-qaadashada, sida in looga baahan yahay aqlabiyad arrimaha qaarkood. Sikastaba ha noqotee, qaacidooyinka noocan oo kale ah waxay noqon karaan kuwa dhib badan haddii ay ka dhigaan haya'daha dowliga ah qaar kamid ah kuwa laga tiro badan yahay ama laga codbato markasta, amaba ay noqoto in haya'daha dowladda qaar laga awood badiyo kuwa kale. Qaabka 'is-ogol loo dhanyahay", ee loo adeegsaday Koonfur Afrika intii lagu guda jiray kala guurka midab-kala-sooca iyo Heshiiskii Jimcaha ee Waqooyiga Ireland ee 1998kii (Good Friday Agreement) ayaa ah hal qaab oo hagaajin kara ka qeybgalka go'aan qaadashada xaaladaha siyadeed ee kala guurka. Koonfur Afrika, is-afgarad loo dhanyahay wuxuu u bahnaa isku tanaasul guud, laakiin taas waa lagu guuldaraystay, kadib  ogolaansho la'aanta jilayaasha siyaasadeed ee aan ka midka ahayn Golaha Qaranka ee Afrika (ANC) iyo waliba dowladda markaas talineysay oo taladeeda iyo tusaaleheeda wali loo baahnaa. Waqooyiga Ireland, taageerada bulshada inteeda badan ee u kala qeybsanaa kooxo diimeed-siyaasadeed oo doonaya midow iyo qaar kaloo wadaniyiin ahba waa loo baahnaa. Aqlabiyadda mid kamid ah bulshada ayaa ku filnaan lahayd, laakiin heshiis la'aanta kooxaha qaar marnaba qasab ma noqoteen inay hor istagaan go'aamada.

Dawladaha ku dhisan isla-oggol ayaa sidoo kale qeexi karta heerka wadajirka ee loogu baahan yahay go'aannada kala duwan. Tusaale ahaan, waxaa jiri kara qodobo  ay tahay lama huraan in loo helo wadar-ogol; kuwa kale wadar ogol waa loo baahan yahay balse hadii is-ogol dhinacyada la helo la aqbali karo; iyo kuwa hadii la helo aqlabiyadda fudud ay ku filan tahay.  Qaab-dhismeed looga gudbi karo is-afgaran-waaga waa lasoo bandhigi karaa, si looga fogeeyo meesha go'aan ay gaaraan shakhsiyaad ku jira fulinta, tusaale ahaan, iyadoo la siinayo sharci-dejiyaasha door ay ku wajihi karaan arrimaha is-mari-waaga siyaaseed. Tani waxay sidoo kale caddeyn kartaa doorka baarlamaanka laga filayo inuu ciyaaro inta ay dowladdu shaqeyneyso.

Dhismaha iyo ka shaqaysiinta dowlad ku dhisan wadar-oggol waa in aanan loo maleyn in aanay qeyb ka ahayn ajendaha balaadhan ee dib-u-dhiska dowladnimada. Hay'adaha kale ee qaranka, sida maxkamadaha iyo hanti-dhowrka guud, ayaa ciyaari kara kaalin muhiim ah oo korjoogteyn ah islamarkaana ku kordhin kara qodobbo gaar ah heshiisyada siyaasadeed ee markaas looga baahdo. Jadwal joogto ah oo looga warbixinayo golaha sharci-dejinta qaranka ee horumarka dowladda ayaa sidoo kale lasoo bandhigi karaa si loo xoojiyo kormeerka. Qaar kamid ah heshiisyada siyaasadeed ee lagu dhisayo dowladda ku saleysan wadar-ogol, waxaa lagama maarmaan ah in la helo korjoogteynta Ururuda heer goboleed ee Soomaaliya ka tirsan tahay sida IGAD, ama waxa la abuuri karaa hab kormeer rasmi ah oo ay hoggaamiyaan shakhsiyaad ixtiraam leh, madax-bannaan, oo waliba kormeeri kara horumarka la sameynayo.

Dhaqdhaqaaqyada siyaasadeed ee Soomaaliya waxaa badanaa lagu gartaa loollan u dhexeeya hay'adaha kala duwan, tanina runtii waa xaalka hadda taagan. Khilaafyada siyaasadeed ee dhawaan dhacay waxaa kamid ahaa

khilaaf dhexmaray laamaha kala duwan ee hay'adaha fulinta dowladda federaalka Soomaaliya, mid u dhaxeeyay hay'adaha fulinta iyo baarlamaanka, mid u dhexeeyay goloyaasha baarlamaanka, iyo sidoo kale mid u dhexeeya dowladda federalla iyo dowlad goboleedyada. Inkastoo, xiriirradan ay u baahan yihiin in la caddeeyo iyadoo qeyb ka ah geedi-socodka dib-u-eegista dastuurka, dowlad ku dhisan is-afgarad ayaa lagu saleyn karaa heshiis siyaasadeed oo ku saabsan sida ay hay'adahaani ula xiriiri karaan midba midka kale marka ay gudanayaan waajibaadka loo cayimay, goorta loo baahan yahay is-afgarad, iyo sida is-afgaradkaas loo qeexayo. Amaba, habab kormeer oo gaar ah ayaa loo samayn karaa jilayaasha siyaasadda si ay ugu xalliyaan khilafaadkooda. Beesha caalamku waxay inta badan door fiican ka cayaari jirtay kor-joogtaynta arrimaha heshiisyada siyasaadda ee Soomaaliya, xiligaan kala-guurkana door way ka ciyaari karaan.

## 6. Sidee ayaa loo horumarin karaa suurta-gelinta awood-qeybsiga?

Go'aan qaadashada kadib, dowladaha ku saleysan is-afgaradka ayaa ka faa'iideysan kara xiriirrada joogtada ah ee u dhexeeya laamaha dowlada. Dowladaha kumeelgaarka ah inta badan faahfaahin kama bixiyaan sida wadatashiyada noocan oo kale ah ay u dhici doonaan, kuwaasoo horseedi kara culeesyo dambe. Sikastaba ha noqotee, ma jiraan wax  joojinaya heshiisyo rasmi ah oo dhexmara si toddobaadle ah xubno kamid wakiilada dowladda. Amaba in kulammada rasmiga ah laga yaabo in looga baahdo golaha wasiirrada ama hay'adaha kale ee dowladda. Kulamada noocan oo kale ah waxay dhalin karaan qaabab rasmi ah iyo kuwo aan rasmi ahayn oo lagu wanaajiyo xiriirka, wax looga qaban karo walaaca,  noqotana madal lagu xalliyo khilafaadka u dhexeeya darafyada markaas wax ka dhaxeeyaan.

Soomaaliya gudaheeda, waxaa jiray hoos-u-dhac xagga kalsoonida ah ee siyaasiyiinta, taasoo salka ku haysa dib-u-dhaca ballaaran ee dib-u-heshiisiinta. In la hubiyo in wadahadal qof ahaaneed dhex maro daneeyayaasha waxay dhalin kartaa in la helo sidii wax looga qaban lahaa arrinkan. Tani waxay si gaar ah muhiim ugu tahay kordhinta aqbalaadda natiijada doorashada, halkaasoo kalsoonida ka dhexeysa hoggaamiyeyaasha siyaasadeed ay muhiim noqon doonto.

## 7. Sidee ayaa loo saameyn kartaa awood-qeybsiga heer-goboleed?

Nidaamka federaalka ah, awood-qeybsiga heer qaran ayaa saameyn ku yeelan kara, ugu yaraan si aan toos ahayn, gaar ahaan laamaha hoose ee dowladda. Dib-u-qaabeynta hannaanka dowliga ee ka hoos baxa dowladda dhexe taasoo qeyb ka noqon doonta nidaamka awood-qeybsiga qaran ayaa laga yaabaa inay dhaliso fursado dheeri ah oo lagu waajaho kooxaha siyaasadeed, taasoo suurto-gelin karta in dowlad loo dhanyahay la dhiso. Dhawaan, awood-qeybinta Koofurta Suudaan waxaa la gaarsiiyay ilaa heer gobol si wax looga qabto khilaafka maxalliga ah ee ka baxsan caasimadda, iyo sidoo kale in lagu daro hannaanka dib-u-heshiisiinta kooxaha siyaasadeed ee dhammaan heerarka kala duwan ee dowladda. Sikastaba ha noqotee, qeybsiga awoodaha ayaa sidoo kale adkeyn kara fulinta qorsheyaasha dowladda dhexe, gaar ahaan marka wakhtiga uu gaaban yahay.

Xiisadaha heer federaal iyo heer dowlad goboleed ee Soomaaliya waa arrin guud. Tusaale ahaan, kala duwanaanshaha u dhexeeya dowladda federaalka iyo dowlad goboleedyada  ayaa  dhawaan u gudbay heer dowlad hoose deegaannada Jubaland oo aan wali gole xukuumad loo samaynin. Samaynta golaha wasiirrada Jubaland ayaa abuuri kara deganaansho heer dowlad-goboleed kaasoo dhameystiri kara shaqada dowladda federaalka. Tixgelinta noocan oo kale ah ayaa sidoo kale laga yaabaa inay khusayso dowlad-goboleedyada kale, si loo taageero hab guud oo ku saleysan is-oggol.


## Credits

This update is a product of the Somali Dialogue Platform, which supports Somalis to achieve consensus on contentious political issues. The Platform is implemented by the Rift Valley Institute and FDG Synergy. Somali Public Agenda also contributed to this research. The Somali Dialogue Platform is funded by the UK Department for International Development. The views expressed do not necessarily reflect the UK government's official policies.

www.riftvalley.net FDG-SYNERGY UKaid from the British people